



Rasuulka Ilaahay scw wuxuu ahaa haduu dhabarkiisa ka soo toosiyo rukuuca, wuxuu dhihi jiray: "samica Allaahu liman xamidah

Ibni Abii Awfaa Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu ahaa haduu dhabarkiisa ka soo toosiyo rukuuca, wuxuu dhihi jiray: "samica Allaahu liman xamidah, Allaahuma Rabanaa lakal-xamdu, mila'asamaawaati wa mila'al ardi wamila'a maa shi'ita min shay'in bacdahu." Ilaahay wuu maqlaa qofka u mahad naqa, Allahayow Rabigayow adaa mahad leh, intay samadu qaado, intuu dhulku qaado iyo muga waxaad adigu doonto oo dhan intaa ka dib".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Waxa uu ahaa Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiiye-marka uu ka tooso rukuucda salaadda mid dhaha: "Alle wuu maqlaa midka ku xamdiya ee u mahad naqa", oo macneheedu yahay: qofka Alle u mahad naqa Allena wuu aqbalaa mahad naqiisa wuuna ka ajar siiyaa, haddana Alle ayuu u mahad naqayey isagoo dhahaya: "Allahayoow Rabbigayoow aday mahadi kuu sugnaatay, inta samada iyo dhulku qaadaan, iyo intaa in kabadan oo waxaad doonto ah waxay qaadi karaan oo mahad ah aday kuu sugnaatay", mahad naq buuxiya samooyinka iyo dhulalka iyo inta u dhaxaysa, iyo waxa kale ee Illaahey doono mahad naq buuxiya.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65101>

